

KAARARKA XAALADAH

Daabaco PDF-kan adigoo aaladaada daabacaada ka dhigayo “u daabaco labada dhinac.” Kaararka ka kala jar xarriiqyada dhibco-dhibcaha ah si aad u kala saarto.



WAXBADAN KA OGOW

Treat People Like People.org

Tilmaamaha

Ka jawaab su'aalaha ku saabsan xaaladaha. Hel talooyin iyo fikrado loogu talagalay u-wada-dhannaanshaha kuwaasoo ku yaalla dhinaca dambe ee kaarka.

Xaaladda

Maariya waa dhagool waxayna soo gashay maqaaxi qaxwo oo mashquul ah. Waxay sheygi ay rabtay ka tilmaantay liiska dalabka, khasnajiigu wuxuu noqday mid sida ka muuqatay yaaban wuxuuna iska ilaaliyay inuu fiiriyo.

Maxay kula tahay?

Maxay kula tahay in khasnajiigu uga falceliyay sidaas? Muxuu samayn kari lahaa khasnajiigu si ka duwan? Sideen adeegsi wanaagsan uga abuuri karnaa goobaha adeegyada macaamiisha?

Xaaladda

Ardayga aad isku fasalka tihiin, Jamaal, wuxuu qabaa naafo waxbarasho wuxuuna u baahan yahay wakhti badan si uu u fahmo tilmaamaha qoraalka ah. Qaar ka mid ah xubnaha kooxda ayaa ka muujiyay niyad-jab waxayna isku dayeen inay ka saaraan hawlaha.

Maxay kula tahay?

Maxaad samayn lahayd haddii aad aragto habdhaqankan? Sidee ayay xubnaha kooxdu u hagaajin karaan filashooyinkooda si ay u noqdaan kuwo aad loogu wada dhan yahay? Waa maxay awoodaha uu Jamaal ku soo kordhin karo kooxda?

Xaaladda

Jordan wuxuu adeegsadaa kursiga curyaanka wuxuuna shaqada ku biiray koox cusub. Shirarka waxaa marwalbo lagu qabtaa qolka shirarka oo ku yaalla dabaqa labaad iyadoo aanay jirin wiish la raaco.

Maxay kula tahay?

Waa maxay caqabadaha uu Jordan wajahayo ee ka baxsan jaranjarooyinka? Waa maxay malaha sababi kara iska indho-tirkan? Sidee ayuu marin-helku u noqon karaa qayb ka mid ah qorshaynta goobta shaqada?

Xaaladda

Lena waa indhoole waxayna danaynaysaa inay ku biirto naadi orod oo maxalli ah. Qabanqaabiyuhu ma hubo sida loo meeleeayo iyada wuxuuna soo jeediyay inay taa beddelkeeda uga qaybgasho daawade ahaan.

Maxay kula tahay?

Sidee ayay jawaabtani u saamaynaysaa Lena? Waa maxay su'aalaha uu qabanqaabiyuhu waydiin karay si uu u noqdo mid taageero badan? Farriin noocee ah ayay ka reebistu u diraysaa kuwa kale?



Xafiiska Gardoonka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafooyinka Koritaanka isagoo kaalmo ka helayo **Golaha Guddoomiyaha Gobolka ee Naafooyinka Koritaanka** ayaa bilaabay ololahan wacyigelinta dadweynaha ee loogu talagalay in lagu baraarujiyo dadka qaba naafada iyo qoysaskooda iyo dadka masuulka ka ah, iyo dadwaynaha guud oo ku saabsan sida loo aqoonsado, loo sheego loogana hortago ku xadgudubka dadka naafada qaba. Ololuhu wuxuu bidhaaminayaa qiimaha uu leeyahay iyo qadarinta uu mudan yahay qofkasta oo qabo naafo. Waxaan dhammaantood uga mahadcelinaynaa deeqsinimada wakhtiga ay ku bixiyeen in ololahan uu noqdo mid dhab ah.

Waxbadan ka ogow halkan ama booqo
TreatPeopleLikePeople.org



Talooyinka U-wada-Dhannaanshaha

Baro calaamado yar oo aasaasi ah, kula xiriir qaybta qoraalka ee taleefankaaga ama isa soo agdhig qalin iyo warqad.

Wada-xiriirka aan afka ahayn kula dhaqan ixtiraam la mid ah wada-xiriirka hadalka ah.

Yeelo dulqaad iyo naxariis macaamilka oo dhan.

Talooyinka U-wada-Dhannaanshaha

Marwalbo dooro goobo lagu shiro oo la wada adeegsan karo.

Goorhore waydii xubnaha kooxda wixi ku saabsan baahiyaha hoysiinta.

Kobci dhaqan goob shaqo halkaasoo u-wada-dhannaanshaha ay tahay masuuliyadda qofkasta.

Talooyinka U-wada-Dhannaanshaha

Dhiirigeli dulqaadka iyo siyaabo badan oo tilmaamo wada-xiriirka ah.

Diiradda saar awoodaha xubin kasta oo ka tirsan kooxda oo dhiirigeli wada-shaqayn u wada dhaxaysa qof kasta.

Qaabee habdhaqan loo dhan yahay adigoo kaqaybgelinaya qof walba si siman.

Talooyinka U-wada-Dhannaanshaha

Ha isaga qaadan—waydii qofka waxa uu u baahan yahay.

Cilmi-baaris ku samee isboortiga la-qabsiga ama u yeer orodyahan hage ah oo caawiya.

Ku dadaal inaad ogaato oo aad hagaajiso marin-helka.